

# MMR

## KU SAABSAN JADEECADA

dhawaan magaalada Bury laga xaqiijiyey xaalado jadeeco ah. Waxa kale oo ay ku badan tahay wadamo kale oo badan oo ah meelaha fasaxa caadiga loo aado. Jadeecadu waa caabuuq fayras oo aad u faafda kaas oo keeni kara cawaaqib xumo.

## Waxaa la heli kara Talaal

Rugaha caafimaadka ee la qabsiga waxay soconayaan ilaa Juulaay waxaa loogu tala galay qof kasta oo da'diisu tahay 1 ilaa 18 jir oo seegay tallaalka MMR sabab kasta ha ahaatee.

Fadlan Iskaan saar calaamada QR si aah u hesho taariikhda iyo goobta rugta caafimaada ee la-qabsiga ee kuugu dhow. Ballamaha waxa lagu samayn karaa adiga oo waca dhatarkaaga [GP].



Haddii aadan hubin in ilmahaagu seegay tallaalka MMR, waxaad ka hubin kartaa dhakhtarkaaga GP-gaaga. Xarumaha caafimaadka ee [GP] iyo Xiriirka GP-ga Bury ayaa sidoo kale la xiriiri doona waalidiinta caruurta diiwaankooda caafimaad ay muujinayaan inay seegeen talaalka MMR.

Tallaalada aan lahayn dufanka doofaarka [porcin gelatine] ayaa laga heli kara. Haddii aad rabtid tallaal aan lahayn defanka doofaarka [porcine gelatine] fadlan usheeg rugta caafimaadka.

Dadka waaweyn ee u maleynaya inay seegeen talaalka MMR waxay sidoo kale sameeyn karaan balanta tallaalka la qabsiga iyagoo la hadlaya Dhaqtarkooda [GP]. Marnaba xilliga kama dhicin ama ma dhaafin.